

## Cusboonaysiinta warbixinta dugsiyada ee KOOFID-19

Janaayo 14, 2021 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Luqadaha sharraxaya nambarada kiisaska ee KOOFID-19 ee iskuulada ayaa la cusbooneysiisaa iyadoo lagu saleynayo jawaab celinta ka timid bahwadaagta waxbarashada oo ay ku jiraan waalidiinta, dugsiyada iyo guddiyada.

Waqtigaan la joogo, iskuulada leh kiisaska CKOOFID-19 waxaa lagu sifeeyay inay ku jiraan feejignaan, dillaac ama ilaalin. Qayb kastaa waxay ka tarjumaysaa tiro cayiman oo kiisas ah oo ka dhacay dugsi gaar ah.

Laga bilaabo 18ka Janaayo, ereyada soo socda ayaa la isticmaali doonaa:

- Digniin: hal ilaa afar kiis
- Dillaac: kiisas shan iyo wixii ka badan

Ereyga "ilaalin," kaas oo lamaanayaal badan ku arkeen jah wareer, dib dambe looma isticmaali doono.

“Tan iyo markii uu bilaabmay aafada, waxaan si dhow ula shaqeynay nidaamka waxbarashada waxaan dhageysanay ra'yigooda. Waxaan u sameyneynaa ereygan eraybixin ku saleysan codsigooda. Luqad cad oo fudud ayaa naga caawin doonta dhamaanteen inaan lashaqeyno qoysaska, Adeegyada Caafimaadka ee Alberta iyo bulshada dugsiyadeena si aan u ilaalino ardayda iyo shaqaalaha.”

*Adriana LaGrange, Wasiirka Waxbarashada*

“Waxaa naga go’an inaan hagaajino isgaarsiinta iyo isbedelkan sida aan u qeexno tirooyinka kiisaska ee iskuullada ayaa naga caawinaya inaan horumarinno. Shuruudaha aan u adeegsan doonno horay usocodka ayaa ah kuwo aad uqurux badan, waxaana rajeyneynaa inay ka caawin doonaan shaqaalaha iyo waalidiinta inay si wanaagsan u fahmaan xaalada KOOFID-19 ee iskuuladooda.”

*Dr. Deena Hinshaw, Madaxa caafimaadka*

### Xogta la xiriirta

Khariidada xaalada dugsiyada ee KOOFID-19

Hagida iyo talaabooyinka caafimaadka ee dugsiyada ee KOOFID-19

[COVID-19 school status map](#)

[COVID-19 guidance and health measures for schools](#)

### Weydiimaha warbaahinta

**Tom McMillan**

780 415-2496

Kaalayaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

**Justin Marshall**

780-913-0264

Xoghayaha Saxaafadda, Waxbarashada

“Ururka Guddiyada Dugsiyada ee Alberta (Alberta School Boards Association, ASBA) waxay u doodayeen in la beddelo eraybixinta ay adeegsatay Dowladda Alberta ee la xiriirta kiisaska KOOFID-19 ee iskuullada waxayna taageereysaa isbeddelada una caddeyn doona shaqaalaha waxbarashada, waalidiinta, ardayda iyo xubnaha bulshada si isku mid ah. Waxaan rajeyneynaa wadashaqeynta joogtada ah ee aan la leenahay wasaaradda maaddaama aan dhammaanteen hubinno in amniga iyo nabadgalyadooda ardayda iyo shaqaalaha la hormariyo.”

*Lorrie Jess, Gudoomiyaha, Ururka Guddiyada Dugsiyada ee Alberta*

“Kuleejka Korjoogayaasha Dugsiga Alberta (College of Alberta School Superintendents, CASS) waxay qaddarinaysaa waqtiga iyo dadaalka ay wasaaradda ku doonayso inay ku dhiirrigeliso wax ku oolka, daah furnaanta, iyo hufnaanta maaraynta iyo isgaarsiinta macluumaadka la xiriira saamaynta aafada ku habsatay bulshooyinkeenna. Istaraatiijiyaddan waxay si xoog leh u taageertay yoolkayaga ah hawlgallada nidaamka ee sii wadaya iskaashi adag oo lala yeesho shaqaalaheenna, bulshooyinka iyo waalidiinta ah.”

*David Keohane, Agaasimaha guud, Kuleejka Korjoogayaasha Dugsiga Alberta*

“Ururka Saraakiisha Ganacsiga Dugsiga ee Alberta (Association of School Business Officials of Alberta, ASBOA) waxay rumeysan tahay in isbedelkan eraybixinta ah uu yareyn doono jahwareerka isla markaana uu kordhin doono hufnaanta, maaddaama ay la xiriirto kiisaska KOOFID-19 ee iskuulada. Waxaan ku qanacsanahay fursada aan ugu wada hadalno oo aan jawaab celin ugu siinno wasaaradda si joogto ah.”

*Dexter Durfey, Gudoomiyaha, Ururka Saraakiisha Ganacsiga Dugsiga ee Alberta*

Dugsiyada leh laba ama in ka badan oo kiisas ah ayaa la sii wadi doonaa in la soo sheego oo lagu muujiyo khariidadda iskuulka ee KOOFID-19 ([COVID-19 school map](#)). Qalabka hagista ee dheeriga ah ee waxbarashada inta lagu jiro KOOFID-19 waxaa laga heli karaa [www.alberta.ca/returntoschool](http://www.alberta.ca/returntoschool).

Taageerada caafimaadka dadweynaha ee la siiyo ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska weli isma bedelin. Waxaa la sii wadi doonaa in la ogeysiyo marka ay jirto hal kiis oo ka mid ah iskuulka caruurtooda iyo taageerooyin dheeri ah ayaa la bilaabi doonaa marka ay jiraan labo kiis ama in ka badan oo iskuulka ah.

Dawladda Alberta waxay ka falcelineysaa faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa noloshu iyo habnololeedka lana raacayo tilaabooyin sax ah, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

### **Xaqiiqooyin degdeg ah**

- Laga soo bilaabo 14ka Janaayo, waxaa jiray 15 xaaladood oo KOOFID-19 ah oo ka dhacay iskuulada tan iyo markii lagu soo noqday waxbarashadii fasalka, taas oo ka dhigantahay boqolkiiba 0,0019 ee ardayda iskuulka. Toban iskuul ayaa heegan ku jira, laba kalena waxay ku jiraan xaalad cudurka dillaaca.
- Xogta iskuullada ka dillaacay cudurka waxay Khadka tooska ku jireen illaa Sebtember 2020.